

## Talaabo degdeg ah oo lagu hagaajinayo adeegyada shaybaarka

Ogoosto 03, 2023 [Su'aalaha warbaahinta](#)

Kumanaan balamaha shaybaarka ah oo bulshada loo qabto ayaa loo diyaariiyay dadka reer Alberta si ay gacan uga gaysato yaraynta wakhtiga sugitaanka adeeggaan caafimaad ee muhiimka ah.

Bukaanada, khaasatan kuwa ku sugar gobolka Calgary, waxay suaan wakhti dheer si ay u helaan adeegyada shaybaarka ee joogtada ah.

Si loo hagaajiyo helitaanka baaritaanka shaybaarka, Alberta Health Services iyo DynaLife waxay gaaraan go'aan wadajir ah si ay ugu saamaxaan Alberta Precision Laboratories (ALP) inay bixiso balamo shaybaar oo dheeraad ah. APL waxay haddaba qabataa shaqada shaybaarka isbitaalada oo dhan iyo xarumaha daryeelka degdega ah ee gobolka ku yaala waxayna adeegyada shaybaarka bulshada ka qabataa dhulka miyiga ah.

“Waa wax aan la aqbali karin in dadka ree Alberta wajahaan dib udhacyo joogto ah so ay u helaan baaritaan fudud ama in dhiig laga baaro. Baaritaanada shaybaarku waa qayb lagama maarmaan u ah safarka daryeelka caafimaadka bukaanka laga bilaabo baaritaanka ilaa daaweynta, dadka reer Albertana waa inay awood u yeeshaan goorta ay u baahdaan iyo goobta ay kaga baahdaan. Taasina waa sababta aan Alberta Health Services ugu amarnay inay hadda isbadal samayso.”

*Danielle Smith, Gudoomiyaha gobolka*

“ Wuxuu Gudoomiyaha gobolku isiiyay amar cad si aan u xaliyo dib udhacyada adeegyada shaybaarka. Maalinta waa maaljn talaabo muhiim ah horey loo qaaday ayada oo si degdeg ah loo bilaabay ballamo cusub waxaana soo socda boqolaal kale dhowrka todobaad ee soo socda. Dowladdeenna waxaa ka

go'an xaqijinta in dhammaan dadka reer Alberta helaan adeegyada shaybaarka oo wakhtiyaysan ayada oo aan loo eegayn halka ay ku noolyhiin."

*Adriana LaGrange, Wasiirka Caafimaadka*

## Balamaha cusub ee aagga Calgary

Hadda laga bilaabo, dadka reer Alberta ee u baahan adeegyada shaybaarku waxay balan ka qabsan karaan Sabtida, Ogoosto 5 ayada oo ay ku mahadsanyihiin soo kordhinta 400 oo ah ballamaha shaybaarka bulshada oo laga helayo South Health Campus iyo Peter Lougheed Centre. 175 balamood oo dheeraad ah oo maalmaha Sabtida ah ayaa lagu soo kordhin doonaa shaybaarka Foothills Medical Centre 12ka Ogoosto. Ballamahaan waxaa lagu heli karaa ayada oo la wacayo 1-877-702-4486 waxayna diyaar u ahaan doonaan balansiga si isdabajoog ah.

Alberta Precision Laboratories waxay sidoo kale qaadanayaan talaabo dheeraad ah si ay usoo kordhiyaan 7,500 ballamood todobaadkiiba, taasoo ah koror 25 boqolkiiba ah aagga Calgary, ayaga oo:

- Qaadanaya oo shaqaalaysiinaya shaqaale dheeraad ah si adeegyada shaybaarku diyaar u ahaadaan lix maalmood todobaadkii gudaha nidaamka shaybaarka isbitaalka ALP, kaasoo soo kordhin doona 2,000 ballamood oo cusub todobaadkii ilaa xagaaga 2023.
- Qandaraas siinaya qolo sadexaad oo adeeg bixiyeyaal ah si ay usoo kordhiyaan awood dheeraad ah, taasoo keeni doonta 3,000 oo balamood oo dheeraad ah todobaad kasta ugu danbayn bartamaha ilaa gabagabada Ogoosto gudaha Calgary.
- Furaya xarun cusub oo loou tala galay adeegga bukaanka bulshada oo ku taala koonfurbari Calgary sidoo kalena balaarinaya xarumaha adeegga bukaanka ee Glenbrook iyo Airdrie, taasoo keenaysa ku dhawaad 2,500 oo ballamaha cusub ah todobaadkii gabagabada xagaagaan.

Waxaanu sii wadaynaa inaan soo helno dhammaanba xulashooyinka noo furan si aan u xaqijino in dadka reer Alberta ay helaan helitaan wakhtiyay adeegyada shaybaarka. Waxaanu bixin doonaa macluumaadkii ugu danbeeyay ee ku saabsan talaabooyinka dheeraadka ah si loo xasiliyo adeegyada shaybaarka marka tafaasiisha la helo.

Dhammaanba ballamaha hadda taagan iyo adeegyada shaybaarku waxay sii ahaan doonaan kuwo loo bixiyo sida loo jadwaleeyay. Dadka reer Alberta waxay sii wadi karaan qabsashada ballamaha ayaga oo adeegsanaya QMe (dynalife.ca), ama wacaaya 1-877-702-4486.

“Diiradeenu waxay saaran tahay bukaanada, iyo badbaadinta badqabka, helitaanka, iyo xasiloona da adeegyada shaybaarka. Wuxaan fahamsannahay kana garaabayaa caqabadaha dadka reer Alberta ay ka wajaheen adeegyada shaybaarka bilihii lasoo dhaafay waxaana naga go'an wax ka qabashada walaacyadaan.”

*Mauro Chies, madaxweynaha iyo Maamulaha Guud, Alberta Health Services*

## **Macluumaadka la xidhiidha**

- [Qabsashada ballamaha shaybaarka](#)

## **Waydiimaha warbaahinta**

**[Scott Johnston](#)**

780-918-4284  
Xoghayaha Warbaahinta, Caafimaadka